Indheergarad – Abril 02, 2021 – Hakisbila - Vol: 01 – Cadadka: 89aad

Turjumidda Buugga "The Second Treatise of Government"

John Locke (1632-1704)

W/T: Cali Barre

© Xuquuqda Faafinta: Mareegta Indheergarad

Email: mrbarre1987@gmail.com

Email: info@indheergarad.com

Turjumid: Cutubka II

C. 2: Xaaladda Dawlad La'aaneed (Of State of Nature)[1]

4. Si suldada siyaasadeed loo fahmo oo asalka saxda ah loo ga soo dhanbalo, waa in aan marka hore firinnaa xaaladda uu basharku asal ahaan ku noolyahay marka aanay awood dowladeed jirin. Xaaladdaas oo ah mid uu qofku xorriyad buuxda u leeyahay in uu sameeyo waxa uu doono, iyo in uu sida uu doono naftiisa iyo maalkiisa ba ugu takrifalo, isaga oo aanay wax xayndaab ah oo aan ka ahayn xeerka dabiiciga ah, celinayn, cidnana aan oggolaansho uga baahanayn. Sidoo kale waa xaalad sinnaansho, oo aanay jirin cid cid kale suldo iyo awood ku leh. Waayo, waa wax iska cad in noolayaasha isirwadaagga iyo isku martabadda ah ee si siman u la dhashay faa'iidooyinka dabiicadda, ay u noqdaan kuwo siman oo aan mid na ka kale ka hoosayn oo u hoos imaanayn, marka la ga reebo in Eebbe weyne uu si cad oo toos ah ugu muujiyo doonistiisa ah in la ka la sarreeyo, oo uu mid madax uga dhigo inta kale.

5. Sinnaantaan dabiiciga ah, sida ay u caddahay oo aanay hadal ba u geli garin aawgeed, waa ta uu garaad Hooker[2] sees uga dhigayo waajibka jacayl ee ay dadka isku leeyihiin, oo uu ku dhisayo xilka dhexdooda iska saaran; oo uu mar kale soo dhiraandhirinayo xeerarka caddaaladda iyo jacaylka.

Hadalladiisa na waxa ka mid ah kuwaan:

''*Mid la mid ah dareenkaan dabiiciga ah waa kan dadka ku baraarujiyay in waajibka ka saaran in ay dadka kale jeclaadan, uusan ka yarayn kan naftooda ka saaran, maadaama*

walxaha siman ay tahay in cabbir mid ah la saaro. Sidaa darteed, haddii aan dadka wanaag ka rajaynayo, in le'eg inta uu qof kastaa naftiisa la rabo, sidee, haddaba u fishaa in baahiyahayga la haqabtiro, haddii aanan ba diyaar u ahayn inaan dhigayga baahiyahooda dhalan ka ah ka haqabtiro, maadaama isku abuur la yahay. Haddii ay soo gaaraan wax liddi ku ah baahiyahaas, oo dhibayana, waa in ay ii xanuunjiyaan sida ay iyaga ba u xanuunjinayso. Sidaa awgeed, haddii aan waxyeello geesto, waa inaan dhibta ka dhalataa keligay dusha u dhigtaa, waayo, ma jirto sabab ay dadku iigu muujiyaan galgaceel ka badan intay iga arkeen. Baahida aan u qabo galgaceel aan ka helo dhigayga, hadda ba, waxa ay dusha iga saaraysaa inaan anigana mid la mid ah bixiyaa. Ma na jiro qof moog xeerarka iyo qawaaniinta maangalka ah ee ka dhalanaya sinnaantaan innaga iyo kuwa inna la mid ah ka dhexeyso, si nolosha loo maareeyo''.[3]

6. In kasta oo ay xaaladdaani tahay mid xorriyadeed, haddane ma ahan mid rukhso, oo aan xayndaab celiyo lahayn. Qofku, in kasta oo uu xor u yahay in uu sida uu doono ka yeelo naftiisa iyo maalkiisa, haddane xor u ma aha in uu naftiisa ama abuurta kale ee hantidiisa ka midka ah waxyeelleeyo, haddii aanay jirin sabab taa dalbanayso. Waa xaalad uu qofku seeteeyo xeerka dabiiciga ah, iyo garaadka, oo ah seeska xeerkaa, oo haddii uu kaashado baraya in qofna uusan xaq u lahayn in uu waxyeello u geesto nafta, maalka, bedqabka iyo xoriyadda qof kale, maadaama la wada yahay noole siman oo ka la madaxbannaan. Sababtuna waa in dhammaan la wada yahay abuurka hal Eebbe oo ogaal iyo xikmad badan, sidoo kale la yahay addoomo dunida ku jooga amarkiisa iyo in ay isaga caabudaan. Sidaasna ku ah wax uu isagu leeyahay oo dunida ku joogo kutalagalkiisa ee aan tooda ku joogin. Sidaa darteed, qof waliba sida ay dowrista naftiisu xil uga saaran tahay, baa si la mid ah, marka tiisu aanay halis ku jirin, xil uga saaran yahay dhowrista tan dadka kale. Qofkuna xaq u ma la ha in uu ku xadgudbo nafta, xorriyadda, bedqabka ama maalka qof kale, aanan ka ahayn in uu qabanayo mid kale oo xadgudub sameeyay.

---

1. Ciwaanka cutubkaan oo ahaay ''Of State of Nature'' waxaan u qaatay sida kor ba ka muuqato ''Xaaladdda Dowlad la'aaneed'', oo aan ka soo amaahday qoraa Rashiid Sheekh Cabdillaahi (Gadhweyne). Sababta aan turjumadaas u doorbidayna, kow; waa in ay gudbinayso fahanka falsafadeed ee dhabta ah oo ay raggii la yimid ka lahaayeen, kaas oo ah xaalad aanay dowladi jirin. Labo; in ay fahanka qofka soomaaliga ah uga dhowdahay turjumadaha kale ee aan arkay sida ''Xaaladda dabeecadeed'' oo uusan ka muuqan macnaha dhabta ah ee laga dan lahaay. Eeg: https://wardheernews.com/wp-content/uploads/2015/11/Qabiil-iyo-Qaran-Waa-Laba-Aan-Israacin-wq-Rashiid.pdf

2. Richard Hooker (1553-1600), waa faylasuuf Ingiriis ah oo uu Locke inta badan soo xiganayo.
3. Eccl. Pol. Lib. 1.

7. Si dadka looga xakameeyo ku xadgudubka xuquuqda dadka kale iyo waxyeelleyntooda, xeerka dabiiciga ahna ee ula jeedkiisu yahay dhowrista bedqabka iyo jiritaanka basharka loo dhawro, waxaa, haddaba, dhaqangelinta xeerkaas u xilsaaran qof kasta, taas oo qofka gar u siinayso in uu duldhigo ciqaab u qalanto kii xeerkaas ku xadgudba. Haddii kale xeerkaa dabiiciga ah waxa uu noqonayaa, sida xeer kastoo kale, mid aan wax macno ah ku fadhiyin, haddii aanay jirin cid dhaqangelintiisa u taagan oo gacanta qabato kan ku xadgudbayo, ilaalisana maatada. Xaaladda dowlad la'aaneedna, haddii uu qof ciqaabi karo qof kale, cid kastaana taa waa ay sameyn kartaa, maadaama ay tahay xaalad sinnaasho oo aanay kala sarrayn iyo suldo jirin, waxa uu qof sameyn karayo si uu xeerka dabiiciga u dhaqangeliyo, qof kaste oo kale na xaq buu u leeyahay in uu sameeyo.

8. Taasi na waa sida uu qof, marka xaaladda dowlad la'aaneed la joogo, suldo iyo awood sharci ah ugu yeelan karayo qof kale. Ma na ahan suldo iyo awood iska furan oo aan seeto lahayn, oo u oggolaanayso in uu sida uu doono ka yeelo dembiilaha uu gacanta ku dhigay isaga oo ay hoggaaminayso caaddifadiisa aan xadka lahayn, se, waa suldo ku kooban ciqaabista dembiilaha ciqaab u dhiganta, sida garaadka iyo damiirku ba dhigayaan, xadgudubka uu galay uu yoolkeedu yahay qabashada iyo ka aargudashada dembiilaha. Waayo, labadaasi waa dawga keli ah ee cidi cid kale u waxyeellayn karayso. Waana waxa aan ugu yeerno 'Ciqaabta'. Subabtuna waa in dembiiluhu, marku uu xadgudub geysanayo, uu caqliga iyo caddaaladda, oo ah xeerka Eebbe dadka u dejiyay si ay bedqabkooda guud u ilaashadaan, ku kufrinayo, sidaas na uu halis ugu yahay basharkoo dhan, maadaama uu xariggii waxyeelladda iyo dhibta ka ilaalinayay jaray. Taasi na maadaama ay tahay xadgudub guud oo dadkoo dhan iyo bedqabkooda ba ka dhan ah, qof walbaa isaga oo ka duulayo waajibka ka saaran ilaalada basharka, waxa uu haddaba gar u leeyahay in uu horistaago, bal uu burburiyo, marka loo baahdo, wax wal oo jiritaanka dadka dhibaatayn karaya, sidaasna uu gar ugu yeelanayo in uu waxyeelleeyo kii xeerka dabiiciga ah ku xadgudbay, si uu dembiilaha uu uga qasbo in uu ka soo noqdo dembiga uu galay, kuwa kalena tusaalo iyo cibro ugu noqdo. Sidaas buuna qof walbaa ku yeelanayaa xaqa ciqaabista xadgudbayaasha iyo fulinta xeerka dabiiciga ah.

9. Shaki ii ga ma jiro in aragtidaani dadka qaar la yaab ku noqon doonto. Balse, inta aanay cambaarayn, ha ii ga jawaabaan bal xaqa boqor ama dowlad gar u siinayo in ay

dil-toogasho ama ciqaab kale ku xukumaan muwaadin shisheeye ah oo dalkooda dembi ku galay? Waa hubaal horta in taasi aanay xeerarkooda ka imaanayn. Waayo, ma ahan xeerar quseeya oo qabanaya shisheeyaha. Xataa haddii ay si toos ah shisheeyaha ugu wajahanyihiin, ku ma qasbano in uu raaco, waayo awoodda xeerkaa dejisay wax suldo ah isaga ku ma la han. Markaa, tusaale ahaan; Iglan, Faransa iyo Holan la joogo, kuwooda awoodda ugu sarreysa ee xeer-dejinta leh, ninka Indiyaanka ah agtiisa wax ba dad kale uga ma duwano oo waxa ay u yihiin ragg aan wax suldo ah lahayn. Sidaa darteed, haddii xeerka dabiiciga ah uusan qofka lagu xadgubay xaq u siinayn in uu ciqaabo kii ku xadgubay, garan maayo, haddaba, sida xeerbeegtida dowlad ay gar u gu yeelanayso in ay ciqaab duldhigto muwaadin dowlad kale ah.

10. Marka la ga yimaaddo xadgubka guud ee ka dhasha jebinta qaanuunka iyo ka tilaabsashada xeerka dabiiciga, kuwaas oo qofka u dhaadhicinayo heer uu u muuqdo mid ka tagay mabaadi'dii abuurta dabiiciga ah ee insaanka, oo uu daadegay in uu noqdo noole xun, waxaa xadgudubkaas ka dhasha oo dhinac socdo cid waxyeello geestay iyo cid kale oo dhibbane u ah waxyeelladaas. Qofka dhibbanaha u ah waxyeelladaas, haddaba, waxaa uu si gaar ah gar ugu leeyahay, marka laga yimaaddo xaqa guud ee ciqaabta oo uu dadka kale la wadaago, in uu ka aargudo kii dhibaateeyay. Qof kaste oo kale na ee u arka in uu arinkaani gar yahay, waa uu ku biiri karayaa, oo uu ka caawin karaa sida uu uga soo dhacsan lahaay kii ku xadgudbay, magta uu isleeyahay waad ku qanci kartaa.

11. Labadaa xaq ee kala duwan ee uu mid yahay xaqa ciqaabta guud ee yoolkiisu yahay joojinta iyo ka hortagga xadgudubyada ee qof walbaa xaq u leeyahay, mid kalane yahay xaqa mag/aargudashada ee gaarka u ah kan waxyeellada loo geestay, baa u wareegayo xaakimka dowladda. Xaakimkaas, oo uu xaqaa wax ciqaabistu ku wareegay, waxa uu awood u leeyahay, haddaba, in mararka qaar uu ka joogsado ciqaabidda dembiilaha, haddii uu u arko in fulinteeda aanay wax maslaxad ah ugu jirin danta guud. Balse, awood u ma laha in uu hor-joogsado magta uu xaqa u leeyahay kii lagu xadgubday. Kan lagu xadgubay keliyaa xaqa ah in uu mag dalbado ama iska daayo leh. Qofka lagu xadgudbay, haddaba, waxa uu xaq u leeyahay in uu la wareego xoolaha iyo hantida kii ku gardarrooday. Xaqaas uu ku mataysanayo waajibka ka saaran ilaalinta naftiisa, sida uu qof walbaa xaq ugu leeyahay, isaga oo ka duulayo waajibka ka saaran ilaalinta basharka, in uu ciqaabo kii xadgudub geesto, si uu uga hortago soo laabashadeeda, iyo in uu awooddiisa dhan isugu geeyo siduu yoolkaas u gaari lahaay. Sidoo kale qof kasta waxa uu xaq u leeyahay, marka la joogo xaaladda dowlad la'aaneed, in uu dilo kii

gardarro wax u dila, si aysan kuwa kale ugu dhiirran xadgudubkaas aanay jirin mag u dhiganto, iyaga oo ka baqayo ciqaabta dadka kale uga imaan karto, iyo si uu sidoo kale uga badbaadiyo basharka dilaagaan caqliga iyo garashada saddexda ku furay ee dilka uu geestay aawadii dagaal dadka oo dhan ka dhan ah iclaamiyay. Sidaa daraadeedna ku mutaystay in loo laayo sida Libaaxa, Shabeelka iyo duurjoogta kale uusan bini'aadanku nabadda ku la noolaan karin oo kale. Salkaas buu na xeerka dabiiciga ee ah kii dhiig islaameed daadiyaa, isna kiisu waa xalaal ku taagan yahay. Qaabiilna[4] waa uu hubay in qof kasta xaq u leeyahay in uu dilo kii wax dilaa, oo waa ka ku qayliyay, ka dib markii uu walaalkii dilay ''*Qof kasta oo gacan igu dhigaa, ha i dilo*''. Sidaa cad bay laabta dadka oo dhan ugu qoran tahay.

12. Waxaa la iswayddiin karayaa haddaba; ma bannaan tahay, marka xaaladda dowlad la'aaneed la joogo in qof xadgudub yar geestay dil lagu ciqaabo? Taana waxaan kaga jawaabayaa in xadgudubkastaa la duldhigi karayo ciqaab gaarsiisan heer ku flan in dembiiluhu qaladkiisa garowsado, dadka kalane baqo gelin karta si aanay ugu dhiirran. Xadgudub kastaa ee ka dhaca xaaladda dowlad la'aaneed, waxa loo ciqaabi karayaa, si la mid sida ay dowladahu wax u ciqaabaan. Inkasta oo aanay yoolkayga ahayn in aan tafaasiisha xeerka dabiiciga iyo qaababka ciqaabteeda galo, haddana waxa sugan in uu jiro xeer dabiici ah, oo cad, oo uu garan karo qof walbo oo garaad leh oo barashadiisa u qalabqaato, sida uu u garan kara ba qawaaninta kale ee dowladaha. Bal ka ba cad kan dadku degsaday, waayo iyadaa ba la fahmayaa oo in badan ka fudud kuwa ku dhisan khayaalka iyo danaha iska horimaanayo ee qawaaniinta loo beddelay. Waana waxa dhab ahaan, dalal badan u ah xeer.

13. Shaki iga ga ma jiro in aragtiyahan cusub ee ah in qof walbaa, marka xaaladda dowlad la'aaneed la joogo, xaq u leeyahay in uu xeerka dabiiciga ah gacantiisa ku dhaqangeliyo, laga ga hor imaan doono doodda ah; in aanay maangal ahayn in dadku ay garsoore ka noqdaan arrin iyaga lagu heesto, waayo naf-jeclaysi baa ku riixayo in ay naftooda iyo saaxiibbadood u eexdaan, dhinaca kale, abuurka xun ee qofka, cadaawadda iyo dareenka aargoosi waxaa laga yaabaa in ay qofka ku qaadaan in uu si xun wax u ciqaabo. Taasina wax aan wareer iyo fowdo ahayn ka dhalan maayo. Sidaa daraadeed baa Eebbe u soo magacaabay Xaakim, si uu u xakameeyo dhibta iyo eexda dadka. Mid waan oggolahay, taas oo ah in dowladnimada madaniga ahi tahay dawada ku habboon aafooyinka xaaladda dowlad la'aaneed, oo aan tiradoodu yarayn. Waayo, waa wax la malayn karo in qof caddaalad-darradu ka gaartay in uu walaalkii waxyeelleeyo ay adag tahay in uu naftiisa ku dhalleeceeyaa dembi ay gashay.

4. Waa mid ka mid ah wiilashii uu dhalay nabi Aadan, ee walaalkii Haabiil dilay.

Balse ragga dooddan ku doodaya waxan xasuusinayaa in boqorraddu ba yihiin ragg. Haddii dowladnimadu na, hadda ba, tahay daawada aafooyinka dowlad la'aanta ee ka dhalanaysa in dadku naftooda garsoore ka noqdaan, taas oo xaaladda dowlad la'aaneed ka dhigaysa mid aan loo dulqaadan karin, waxa aan doonayaa, hadda ba, in aan ogaado nooca dowlad ay tahay mid uu hal nin, oo ay ciidan badani ka amarqaataan leeyahay xorriyadda ah in uu naftiisa garsoore ka noqdo, dadkana waxa uu doono ku sameyn karo, oo aanay jirin cid xor u ah in ay ku warceliso ama xakamayso kuwo rabitaankiisa ku shaqeeya, oo lagu sandullaysanyahay iyo sida ay uga wanaagsan tahay xaaladda dowlad la'aaneed ee uusan qofku ku qasbanayn in uu u hoggaansamo rabitaanka qof kale, wixii qalad ah na, isaga ha galo ama ha laga galo e, dadku ay garsoorayaal ka yihiin.

14. Waxaa kale oo badanaa la iswayddiiyaa iyada oo dood laga dhigayo, halkay ka jirtaa, ama ka jirtay ba xaaladdaa dadku ku noolyihiin dowlad la'aanta? Jawaabta wayddiintaa oo kooban waxan ka oranayaa; dad xaaladdaa ku nool waa ay jiraan, weligeedna waa ay jiri doonaan, waayo dowladaha qofka keliga ah u taliyo[5] iyo kuwa uu xaakim madaxa-bannaan ba u taliyo dhamaantood waxa ay ku noolyihiin xaaladdaa. Sababta aan ugu soo darayne kuwa ay u taliyaan ragga madaxa-bannaan, ha ahaadaan kuwo heshiis kula jiro kuwo kale ama yaysan ahaanine, waa in heshiis walbaa oo la galo uusan ahayn mid dadka ka saarayo xaaladda dowlad la'aaneed, looga baxo keliya kan lagu heshiiyo in la samaysto jir-siyaasadeed oo qur ah, laguna noqdo bulsho-siyaasadeed oo mid ah. Heshiisyada iyo wacadyada kale oo ay dadka galaan ma ahan kuwo dadka ka saarayo xaaladda dowlad la'aaneed. Tusaale ahaan; heshiiska ay wada galaan labo nin oo Jasiirad ku nool, ama nin Iswiisarlandiis ah iyo mid Hindiyaan ah oo ku nool kaynta Ameerika, waa heshiis jira, walow ay weli ku sugan yihiin xaaladda dowlad la'aaneed, waayo, wacad oofintu waa waajib qofka u suran in uu yahay qof ee ma ahan mid u saaran in uu bulsho ku mid yahay.

15. Kuwa weli ku doodayo in dadku aanay weligood ku noolaan xaalad dowlad la'aaneed, waxaan kaga jawaabayaa xujadda Hookar[6] ee ahayd:

''*Qawaaniinta kor ku xusan, oo ah xeerarka dabiiciga, waxa ay dadka u qabanayaan in ay dad yihiin, xataa haddii aanay heshiis cad ku gelin waxa bannaan in la sameeyo iyo waxa aan bannaanayn. Dadkuna, maadaama, uusan baahiyaha tirada badan ee noloshooda aanay keli keli u haqabtiri karayn, oo aanay nolol milgo leh keli ku gaari karayn, dantu*

waxa ay ku riixday, si doldoloolladaas iyo cilladahaas loo owdo, in ay is kooxaytaan oo is kaashadaan. Waana sababta asal ahaan dadka ku riixday in ay bulsho siyaasadeed sameystaan''.[7]

Waxaan kaloo carrabka ku adkeynayaa in dadku asal ahaan ba xaaladdaas ku suganyihiin, kuna sugnaanayaan inta ay ka gelayaan heshiis xor ah oo ay ku noqonayaan xubno ka tirsan bulsho siyaasadeed. Waxaana hubaa in arrinkaasi ku caddaan doono doodaha soo socdo.

---

5. Eraygaan waxaan u qaatay booska Monarchy.

6. Waa isla Richard Hooker-kii aan kor ku soo xusnay.
7. Eccl. Pol. lib. i. sect. 10